# Warbixin ku saabsan socdaallada oo loogu talagalay, dadyoowga qaban-laab jinsiyadood ama ruqsadda degenaanshada ee dalka Iswiidan



Regeringskansliet
Utrikesdepartementet

**Dalka Iswiidan wuxuu tan iyo dhowr sannadood oggol yahay, in qofka jinsyada dalka Iswiidan haysto in uu jinsiyad kale haysan karo. Dhammaan dadyoowga haysto jinsiyada dalka Iswiidan, waxay xaq ku leeyihiin caawinaadda qunsuliyadaha Boqorttoyda dalka Iswiidan. Waa caawinaad joogto ah, sugan oona waafaqsan nidaamyada hirgalay. Inkastoo dalka Iswiidan loola dhaqmo dhammaan muwaatinyiinta dalka Iswiidan hab siman oo waafaqsan nidamyada hirgalay, ayay haddana waxaa dhici karto in dalka labaad ee qofku jinsiyada ka haysto, u caqabadeeyo waxkaqabyadii hay'adaha dalka Iswiidan ay ku dhaqaaqi lahayd dalka u qofkaas ku sugan yahay. Wasaaradda Arrimaha Dibadda waxaa badi ahaan lagala soo xiriira arrimahaas oo kale. Sidaas awgeed, warbixintaan waxaa ku qoran jawaabta su'aalaha caadi ahaan lays waydiiyo.**

Haddii qofku u jinsiyad ka haysto laba dal, wuxuu haysta jinsiyad labanlaab ah. Qofka la siiyo jinsiyada dalka Iswiidan, wuxuu xajisan karaa jinsiyadiisi hore, waa haddii dalkiisa hore uu oggol yahay.

Qof kasta oo jinsiyada dalka Iswiidan haysto wuxuu xaq ku leeyahay caawinaad, xitaa haddii weli uu jinsiyad ka haysto dalkiisi hore. Iyadoo sidaasi tahay, ayaa haddana waxaa dhici karto in, dalka kale usan oggolayn jinsiyada dalka Iswiidan. Taasoo xad u yeelayso heerarka caawinaada ee hay'adaha dalka Iswiidan ku caawini karaan qofka markii uu ku sugan yahay dalkiisi hore. Waxaa la oran karaa in hay'adaha dalkii hore aysan wax warbixin ah siinayn hay'adaha dalka Iswiidan . Sidaas awgeed, dadyoowga haysto jinsiyada dalka Iswiidan iyo jinsiyad kale, waa in ay ogaadaan in ay adag tahay in caawinaad ay hay'adaha dalka Iswiidan ka helaan, haddii xaalad adag ay kala kulmaan dalkoodi hore.

### Markii Wasaaradda Arrimaha Dibaddaay ay talo ahaan soo jeediso in aan socdaal loo tegin dalalka qaarkood

Wasaaradda Arrimaha Dibadda waxay soo jeedin kartaa talo xiriir le leh socdaallada, taasoo ah in xaaladda ammaanka ka jirto dalka loo socda ay saamayn ku yeelan karto socdaalka. Waxaa dhici karto in tusaale ay jiraan rabshado bulshodeed, xoog isku sheegasho, masiibooyin dabiici ah ama halista faafidda cudurrada halista ah. Wasaaradda Arrimaha Dibadda waxay soo jeedin kartaa talo xiriir le leh in dalkaas aan loo tegin *socdaallada aan ahayn lagamaarmaan*, sida socdaallada dalxiiska iyo booqashooyinka, *socdaalladaha oo idil*, xitaa kuwa shaqo ama arrin kale darteed loo galo. Waxaa kaloo jirto xaalado oo *Wasaaradda Arrimaha Dibadda ay soo jeedinayso talo ah in gebi ahaan aan socdaal dalkaas lagu tegin iyo in dadyoowga haysto jinsiyada dalka Iswiidan dalka ka baxaan*. Talo soo jeedinta noocan ah waxay xitaa sababi kartaa in Wasaaradda Arrimaha Dibadda/safaaradda aysan haysan fursado fiican oo ay qofka ku sugan dalkaas ku caawinto.

Caymiska socdaallada caadi ahaan ma hirgalo, waa haddii Wasaaradda Arrimaha Dibadda ay rasmi ahaan soo jeediso talada xiriirka la leh socdaallada . Waxaa dhici karto in qofku uu baahan yahay caymis dheeraad ah oo ku badbaado haddii u go'aansado socdaalka,

inkastoo Wasaaradda Arrimaha Dibadda kula talisay in usan socdaalka ku dhaqaaqin. Waxaa muhim ah in layska hubsado shuruudaha caymiska socdaalka ku qoran, iyo shuruudaha socdaalka u qofku xajistay.

## Ku saabsan guur/aroos iyo xannaanaynta ilmaha

Lama hubo in nikaax ka dhacay dalka Iswiidan laga aqoonsan yahay dalal kale ama in dalka Iswiidan laga aqoonsan yahay nikaax dal kale ka dhacay. Sidaasoo kale, lama hubo in go'aan furitaan ama go'aan maxkamadeed oo ku saabsan xannaanadda carruurta uu toos ugu hirgeli karo dal kale. Sidaas awgeed, waa arrin muhim ah in la hubsado go'aanada ka hirgeli karo dal kale ee jinsyadda laga haysto. Dalalka qaarkood waxaa laga hela fursad u qofku waalidka ah, u xayiraadda socdaalka ku soo rogi karo ubadkiisa. Taasoo sababayso in waalidka kale usan ubadkiisa la dhoofi karin, inkastoo haddana waalidiinta ay dalka Iswiidan ku haystaan xaqa xannaanadda ubadkooda.

## Ku saabsan tababarka difaaca qaranka

Dalal badan waxay qabaan tababarka difaaca qaranka oo dirqis ah. Qofka jinsiyad ka haysto dalalka tababarka difaaca qaranka oo dirqis ah, wuxuu ku qasban yahay in uu waajibkaas hab buuxda ku soo guto. Waa arrin gudashadeeda waajib ku ah, xitaa haddii u degan yahay dal kale oona dalkaas ka haysto jinsiyad labaad. Sidaas awgeed, qofku waa in ku tala gala in loo yeeri karo, sida markii u booqanayo dalka kale ee u jinsiyada ka haysto.

Dalal qaarkood waxaa ka jiro halista xabsi, waa haddii qofku usan gudan waajibka ka qaybgelida tababarka difaaca qaranka oo dirqis ah. Taasi ayaa dhici karto haddii qofku usan ka warqabin gudashada waajibkaan ama ka da' wayn yahay da'dii uu waajibka ku gudan lahaa. Qofka haysto laba jinsiyado, waxaa lagula talinaynaa in uu arrinta ka salgaro ee uu la xiriiro hay'adaha arrimahaan maareeya.

## Micno ma leedahay nooca baasaboorka u qofku ku socdaal galo?

Qofkii socdaal ku galo laba baasaboor, waa in uu ku talagala in ciidamada xadka ilaaliya iyo hawlwadeneyada kastamka ay ku dhaqaaqi karaan kontrool dheeraad ah. Waxaa laga yaaba in baasaboorada midkood usan lahayn shaabada dal gelida ama dal ka bixida. Waxaa dhici karto in laga shakiyo sababta u qofku laba baasaboor u isticmaalayo. Dalal qaarkood waxaa dhici karto in qofka laga qaado baasaboorada midkood iyo in xitaa la ganaaxo. Waxaa kaloo dhici karto in qofka loo diido in uu dalka ka baxo. Hay'adaha dalka Iswiidan saamayn kuma yeelan karto, oo waxba kama qaban karto haddii qofku loo diido in uu dalkaas galo ama ka dhoofo. Waa isla sida dalka Iswiidan usan oggolayn in dalka kale uu soo farageliyo nidaamyada iyo sharciyada dalka ka hirgalay. Qofku wuxuu mar kasta xaq u leeyahay in uu qunsuliyad dalka Iswiidan uu caawinaad waydiisto. Laakin haddii qofku uu dal kale ku galo baasaboorka dalkaas laga leeyahay, waxaa dhico karto xaaladaas in hay'adaha dalkaas yiraahdaan dalka Iswiidan xaq kuma laha in qofku caawinno, haddii ay taasi ay dhacdo qofku wuxuu la kulmayaa dhibaato culus.

## Maxaa dhici karo haddii qofku u ka lummo baasaboorkii uu dalka kale ka haystay?

Haddii qofku u ka lummo baasaboorkii uu dalka kale ka haystay, waa in uu safaaradda/qunsuliyadda dalka baasaboorka siiyay la xiriira oo uu waydiista baasaboor cusub. Haddii qofku u ka lummo baasaboorkii uu dalka kale ka haystay waa in uu baasaboor ka codsada hay'adda baasaboorada ee dalkaas.

## Maxaa dhici karo haddii qofku uu isagoo dal dibada ku sugan, oo ka lummo kaarka ruqsadda degenaanshada ama ruqsadda degenaanshada joogtada ah (UT ama PUT)?

Baasaboorada iyo kaararka UT/PUT waa hanti, sidaas darteed waa in sidaasoo kale loo dhaqaaleeyaa. Qofku waa in socdaalka kahor uu hubsada taariikhda uu waxtarka kaarka dhici doono. Haddii isagoo dal dibada ku sugan uu ka lummo kaarka UT/PUT waa in uu durbadiiba wargeliyaa booliska dalkaas. Markaas kaddib ayuu la xiriiri karaa safaaradda ugu dhow, kaddib codsan karaa in loo sameeyo kaar cusub, laakin waa in uu tusa cadaynta wargelinta ciidanka booliska. Safaaradaha maareeya arrimaha soog-galeetiyada oona hasto qalabyada loo baahan yahay, ayaa aqbali karo codsiga kaarka UT/PUT ee cusub. Kahor intii aan la siinin kaarka UT/PUT waa in uu aqoonsigiisa caddayn karo. Kaddib markii qoflu u dalbado kaarka cusub, waxaa durbadiiba la ciribtira waxtarkii kaarkii lummay. Caadi ahaan dhowr toddobaad ayaa la suga kaarka cusub.

Haddii qofku u ku sugan yahay dal aan ka furnayn safaaradda dalka Iswiidan, ama safaarad ay ka furan tahay laakin aan arrimaha soo-galeetida shaqo ku lahayn, ama safaaradda aynan haysan qalabyada lagu sameeyo kaarka UT/PUT, wuxuu qofku xaaladaas safaaradda dalka Iswiidan ee ugu dhow halka u ku sugan yahay, taasoo maarayso arrimaha qaxootida, iyada ayaa kaddib la xiriirayso Hey'adda Socdaalka oo kaddib kala tashanayso sidii xal loogu heli lahaa arrinta jirta.

Teeda kale, waa in qofku u ka fekera in baasaboorada oo ah noocyada [främlingspass] iyo [resedokument] ay qofka u suurtagelinayn in dalkiisa hore ku tago.

## Maxaa dhici doono haddii qofku u ku xannuunsado dal kale ee jinsiyadiisa haysto?

Haddii qofku u ku xannuunsado dalka kale ee u jinsiyada ka haysto, waa in uu marka hore la xiriira goobaha daryeel-caafimaadeedka ee dalkaas. Haddiise qofku u haysto hal ama laba jinsiyadood, wuxuu xaaladaas xaq ku leeyahay in qunsuliyadda, ka codsado kaalmo-dhaqaaleed. Qofku waa in uu mar kasta ka fekera in uu haysto caymiska socdaallada, oo wax u tari doono muddada socdaalka oo idil, kana hirgalay dalka/gobolka u booqan doono.

.



## Qofka qunsuliyadda dalka Iswiidan ma ka heli karaa kaalmo-dhaqaaleed ee, haddii u la kulmo dhibaato dhaqaaleed isagoo ku sugan dal kale ee uu jinsiyad ka haysto?

Haddii qofku u haysto laba jinsiyadood, sida kan dalka Iswiidan iyo kan dal kale, uu la kulmo dhibaato dhaqaaleed isagoo ku sugan dalkiisa hore, oona iskiisa ama qaraabadiisa xal ugu heli karin, waa in marka hore uu la xiriira hay'adaha maxaliga maadama u ku sugan yahay dal uu jinsiyadiisa haysto. Haddii usan xal xaaladda dhaqaaleed u helin, wuxuu qunsuliyadda dalka Iswiidan (safaarad ama qunsuliyad) ka codsan karaa kaalmo-dhaqaaleedka.

Lacagta kaalmo-dhaqaaleedka ahaan qofka loo siiyay waa dayn, taasoo ka midaysan yihiin dhammaan muwatinyiinta dalka Iswiidan. Wixii dayn ah na dib ayaa loo bixiyaa. Nidaamka waxaa ku xusan in qofka haysto jinsiyada dalka Iswiidan oona dalka Iswiidan ku nool oo keliya ayaa xaq ku leh dalbashada kaalmo-dhaqaaleedka noocaas ah. Teeda kale, shuruudaha waxaa kamid ah in xaaladda adag ee jirta aysan ahayn mid qofku isku keenay. Taasoo macneheeda ay tahay, in qofku tallaabo taxadarsanaan ku salaysan ka qaaday socdaalka kahor (sida tusaale in uu haysto tikitkii u dalka ugu soo laaban lahaa, caymis, lacag iwm). Tan kale waa in qofku u haysta caddayn xiriir la leh in usan siyaabo kale u dhibaatada haysto ku xalin karin, sida in eheladiisa ama hay'adaha kale ee dalka Iswiidan aynan arrinta ka caawini karin. Qof kasta oo dayn la siiyo waa in uu dib u bixiya iyo khidmada dayntaas lagu maamulay.

Wasaaradda Arrimaha Dibadda ama safaaradaha, waxay caawini karaan oo taageero siin karaan dadyoowga aan haysan dal ay sheegtaan iyo qaxootida dalka Iswiidan ku nool, oo ku sugan xaalad xun iyagoo dal dibada ku yaallo ku sugan. Haddii qofku u haysto ruqsadda degenaanshada ee joogatada ah oona ku nool yahay dalka Iswiidan, wuxuu qunsuliyadda ka heli karaa kaalmo-dhaqaaleedka waa haddii ay jirto xaalad gaar ah.

## Maxay yihiin shuruudaha khuseeya qof isagoo dal dibada ku sugan xuriyadda laga qaaday?

Qofkii ciidanka booliska gacanta u gala isago dal dibada ku yaallo ku sugan, oona kaddib xurriyadda laga qaaday, waxaa mar kasta hirgala sharciyada dalkaas u degsan. Haddii aan warbixin sugan la hayn, waxaa fiican in qofku u raadsado warbixin ku saabsan sharciyada iyo nidaamyada ka hirgalay dalka u socdaal ku tegi doono. Hay'adaha dalka Iswiidan saamayn kuma yeelan karo hawlgallada sharciyada ku salaysan ee dal kale ka hirgalay, waa isla sida dalka Iswiidan usan oggolayn in dalka uu soo farageliyo nidaamyada iyo sharciyada dalka ka hirgalay. Sida hadba ku xusan Heshiiskii Vienna ku saabsana xiriiryada qunusuliyadaha, wuxuu qofka xurriyadda laga qaaday xaq ku leeyahay in saafaradda dalkiisa la wargeliyo, xaaladda adag ee qofku ku sugan yahay. Haddii qofku u raali ka yahay, waxay safaaradda codsan kartaa in ay qofka booqato. Wasaaradda Arrimaha Dibadda waxay kaloo wargelin karta ehelada qofka oona lahaan kartaa xiriir joogto ah, waa haddii qofku u raali ka yahay.

## Sidee baa Wasaaradda Arrimaha Dibadda caawinaad looga heli karaa haddii qof u ku geeriyoodo dal dibadda ku yaallo?

Haddii qof ku sugan dal dibada ku yaallo u geeriyoodo, waxay Wasaaradda Arrimaha Dibadda, ehelada ka caawini kartaa helida warbixin ku saabsan dhacdoonka iyadoo la xiriirta hay'adaha maxaliga ah. Haddii al-marxuum u qabay caymis, waxaa caadi ahaan hawlaha wax-ku-oolka ee xiriirka la leh geerida la wareegta shirkadda caymiska.

Haddii marxuumka usan wax caymis qabin, waxay Wasaaradda Arrimaha Dibadda ehelada ka caawini kartaa talo, xiriir la leh sidii qofka ama dadka geeriyooday loo soo qaadi lahaa janaasadooda, ama talo ku saabsan in lagu aaso halka u qofku ku geeriyooday. Wasaaradda Arrimaha Dibadda ma bixiso kharashaka gaadiidka marxuumka ee ku geeriyooday dal kale.



**Warbixin dheeraad waxaad kala xiriiri kartaa**

swedenabroad.se | regeringen.se/uds-reseinformation | facebook.com/udresklar

Bogga government.se/dualcitizenship waxaad ka heli kartaa warbixintaan uu ku qoran luqado kale.